

Maktabada Dadweynaha Fargo waxay leedahay qaniimaad badan oo bilaa eexashaa si ay kaaga caawiso inaad barato wax kusaabsan maaliyadaada, kaydsgaaga iyo maalgashigaaga. Booqo shabakadayada ee barta www.fargolibrary.org/moneysmart



macluumaad ku saabsan dhacdooyinka maktabada ee soo socda iyo iskuxidhka si looga heli karo maktabada qaniimaad lacageed oo toosa. Sidoo kale waxaad kuyara hakan kartaa

Qolka Macluumaadka ee Maktabada Weyn ama Maktabada Dr. James Carlson si loo ogaado dariiqoyin intaas kabadan si aad xariif ugu noqoto lacagtaada.

SAACADAHA

MAKTABABDDA DADWEYNAHA FARGO

102 3rd St. N. • Fargo
(701) 241.1472

Isniin - Khamiis 9-9
Jimce..... 11-6
Sabti..... 9-6
Axad 1-6*

**Maktabadda Weyn waxay xidhan tahay Axadaha laga bilaabo Maalinta Xuska Shuhadada Maraykanka ilaa Maalinta Shaqaalaha.*

MAKTABADDA DR. JAMES CARLSON

2801 32nd Ave. S. • Fargo
(701) 476.4040

Isniin - Khamiis 10-8
Jimce..... 11-6
Sabti..... 9-6
Axad 1-6*

**Maktabadda Dr. James Carlson waxay xidhan tahay Axadaha laga bilaabo Maalinta Xuska Shuhadada Maraykanka ilaa Maalinta Shaqaalaha .*

NORTHPORT BRANCH

2714 N. Broadway • Fargo
(701) 476.4026

Isniin - Khamiis 10-8
Jimce..... 11-6
Sabti..... 9-6
Axad Way xidhan tahay

WWW.FARGOLIBRARY.ORG



XARIIFNIMADA LACAGTA (MONEY SMART)



Ku-bilow Xariifnimo:
Bilowga Maalgalinta



MAALGALINTA: AFKAARAHA UGU MUHIIMSAN

Markaad bilaabayso maalgelin, waxaa jira ikhtiyaaro badan oo la xidhiidha sida iyo goobta aad ku maalgalinayso lacagtaada. Tani waa ku adkaan kartaa qof aan garanayn shuruudaha iyo afkaaraha loo isticmaalay si loo sharxo ikhtiyaarada maalgeminta kala jaadjaadka. Barashada qaar kamida shuruudaha asaasigaa, maalgaliye bilaabe ah ayaa samayn karaa go'aano xariifnimo ah oo kusaabsan lacagtaada.

KHATARTA

Maalgelinta qaar, waxaa jira fursad kaydsgaagu aan laga yaabin in ay shaqayso lacag dheeraada ama aad ku khasaari karto qayb kamida bilowgii hore ee maalgalintaada. Laakiin haddii aad diyaar u tahay inaad qaadata khataraha qaarkood ee maalgalintaada, waxaad haysataa fursada si aad u kordhiso kaydsgaaga hawlgabka ama himilooyinka kale ee kabadan haddii aad soo gashay khataro waxoogaa kayar.

SOO CELIN



Soo celinta maalgalintu waxaa weeye waxaad dib uga hesho maalgalinta aad samayso. Tusaale ahaan, haddii aad soo iibsatay saamiyo qiimaheedu yahay \$30 saamigii kasta,

oo aad saamiyadaas ku iibiso \$35 saamigii kastaba, lacagta kuu soo noqotay waxay noqonaysaa \$5 saamigii kastaba. Khatararta iyo soo celintuba badiyaa way isku xidhan yihiin. Marka uu sii bataba filitaanka macaashka maalgelintu qiimo ahaan, waxa isla mar ahaantaas kordha khatararta hoos u-dhaceeda.

WAQTIGA

Waqtigu waxaa uu ka caawin karaa maalgaliyaha dhawr dariiqadood:

- Waqtigu wuxuu ku siinayaa fursad si aad u qaadata khatararta maalgelinta, kaas oo fure u ah koboca muddada-dheer ee maalgalinta.
- Waqtigu wuxuu suurtoogalinayaa qorshaynta himilooyinka muddada –dheer qaata, sida hawlgabka oo kale.
- Waqtigu wuxuu u ogo'laanayaa maalgalintaada inay labanlaabanto, ama qiimaheedu koro.

Labanlaabanku “Compounding” waxaa weeye waxa dhaca marka macaashka maalgelintu ama dakhliga dib loo maalgaliyo oo lagu daro raasamaalka, ama maalgalintaadii aad ku bilawday. Markuu raasamaalkaagu sii kordhaba, waxa badanaya macaashka aad ka filanayso maalgelintaada. Sidaas daraadeed markaad muddo dheer si hayso maalgalin, waxay kadhigan tahay ixtimaal badan ood kamacaashto labanlaabanka.

KALA DUWANAANSHAHA

Kala duwidu waa qaabka galinta lacagtaada noocyo kala duwan oo maalgalin ah si loo yareeyo qaddarka khatararta, oo misanaad ka faa'iidayso fursadaha maalgalinta. Waxay kaa caawinaysaa dhawritaanka qiimaha maalgalintaada guud ahaan, xaataa haddii mid ama ka badan ikhtiyaaradaada maalgalintu aanay midho dhal ka samayn inta badan ee soo noqota.

NOOCYADA MAALGALINTA

Maalgalin khatar yar

Ikhtiyaaro maalgalin leh khatar yar waxay ka dhigan tahay in ay jirto fursad yar ama aanay jirinba inaad lumiso qayb ka mida raasamaalka maalgalintaada. Si kastaba ha ahaatee, sidoo kale macnaheedu waa in faa'idadaada aad ka heshay maalgalintaada aanay noqonayn mid sidaa u sii wayn. Maalgalinta leh Khatar yar waxaa ku jiri kara:

- Shahaadadaha kaydsga
- Biilasha khasnadda
- Xisaabaadka suuqa iyo lacagaha maalgalinta

Khatar meel dhexaada

Noocyadan maalgalinta ah waxay bixiyaan lacag faa'ido ah oo aad uga wayn ikhtiyaarada khatararta yar leh, laakiin fursada khasaaraha qaar ayaa iyana korodha. Ikhtiyaarada khatararta dhexe badiyaa waxaa ku jira maalgalinta ay waxoogaa waqtigeedu dheer tahay, oo waxay ku jiri kara dhibaato badan sidii ay ugu badali lahaayeen lacag marka maal loo baahdo. Waxaa jira fursado kala doorasho oo maalgalinta khatararta dhexe leh:

- Saamiyada guud ahaan, shirkaddo dhisan
- Bonds a ay ku jirto bonds-ka dawladaha hoose
- Saami wadaagyada hore look ala saaray

Khataro sare leh

Maalgalinta loo tixgaliyo in ay yihiin qaar leh khatar sare sidoo kale waxay bixiyaan cadad sare oo lacag faa'ido leh. Haddii aad haysato waqti fiican si aad ula kulanto himilooyinkaaga maalgalinta, waxaa laga yaabaa inaad



doorato maalgalin khatar sare leh waayo waxaad haysataa waqti badan ood kaga soo doogsato khasaaraha ood sii wado in maalgalintaadu ay kobacdo. Khataraha sare qaarkood, Fursado wax lagu kala dooran karo maalgalinta abaalgud sare leh waxaa weeye:

- Maalgalinta shirkaddaha gaarka loo leeyahay, ama shirkaddaha inta yar kubilaaba
- Shirkad maalgalinee oo saamiyo iibisa ayaa xooga saaraysaa koboca maalgalinta shirkaddaha ama waraaqo caddaynaya in maalgalintaada iyo dulsaarba lagu celin doono
- Iswaydaarsiga lacag maalgalinta ganacsiga Intooda badan Fursado wax lagu kala dooran karo maalgalinmahan waxay u eekaan karaan qaar cagajuglayn ama jahwareer wata. Waad yarayn kartaa kahatarahahaaga ood kordhin kartaa ixtimaalka faa'idada adigoo lasoonaya Fursado wax lagu kala dooran karo kusaabsan goobta ay tahay si aad u maalgaliso kaydsgaaga.